SOMLISKA

Folkhälsomyndigheten
PUBLIC HEALTH AGENCY OF SWEDEN

TALO IYO WARBIXIN KU SAABSAN ANTIBIYOOTIKADA IYO CAABUQYADA (INFEKSHANKA)

# Infekshan ku dhaca hogaga sanqada

ISBN 978-91-7603-097-4 (pdf) februari 2014

**Waxa dhicikarta in dureyga ama hargabka caadiga ah keeno in xuubka gudaha ee sanka iyo xuubka hogaga sanqada u furani bararaan. Taasi waxay keentaa in qofku yeesho siin, duuf adag iyo hogaga sanqada u furan oo xanuuna. Hargabku wuxuu sida caadiga ah ku dhacaa caruurta yaryar 6 ilaa 8 jeer sanadkii. Dadka waaweeyna 2 ilaa 3 jeer ayuu ku dhacaa, in kasta uu tiradaasi kaga badan karo haddii ay caruur ka 'ag-dhawyihiin. Dawooyinka antibiyootikadu duriga ma daweeyaan.**

Infekshanka ku dhaca hogaga sanqadu, waa bukaan saameeya sanka iyo hogagaasi, waxana keena fayras ama bakteeriya. Waxa se dhicikarta in mararka qaarkood sababta keenta bukaankaasi noqoto xasaasiyad (allergy). Badana bukaanada hogaga sanqada ku dhacaa iskood ayay iskaga bogsadaan.

## Dadka waaweeyn

Antibiyootika ayaa daweeynkarta dadka waaweeyn ee hargab kaga bixiwaayo in ka badan 10 cisho, ee yeesha duuf midab leh iyo xanuun badan oo ay ka dareemaan dhabanada iyo ilkaha. Taasi waxay imanaysaa dhakhtarka oo marka hore baadhis sameeyay oo dulalka sanka ku arkay duuf adag oo tilmaamaya infekshan, iyo iyadu cabashadu saameeysay hogaga sanqada midkood.

Antibiyootikadu wax kama tartikarto infekshanka fudud ee ku dhaca hogaga sanqada. Haddii uu se infekshanku yahay mid culus oo ay muujisiay raajo (X-Ray) ama uu muujiyay Ultrajud. Isticmaalka antibiyootikadu wuxuu ka-bogsiga xanuunka soo gaabin kara 4 ilaa 5 cisho. Xanuunka noocaasi ihi, wuxuu inta badan, sii jiitama 2 ilaa 3 todobaad, haddii antibiyootika la qaato iyo haddii kalaba.

## Caruurta

infekshanka da'da caruurnimada dadka ku dhaca, waxay muhiim u yihiin dhisidda is-difaacidda jidhka iyo xanuun u adkeeysiiga. Sidaa awgeed, ayay caruurtu u duri-qaad badanyihiin oo ay muddo dheer duuf midab leh u yeeshaan. Dawooyinka antibiyootikadu wax kama tarikaraan haddii taas oo kale jirto. Haddii muddo dheer ilmuhu duuf ku leeyahay dul keliya, taasi waxa ugu wacnaankara iyadoo ilmuhu sanka wax iskageliyay sida kuul yar ama walax yar oo kale oo ku dhegsan dulka gudihiisa.

## Talo

- Waxa xanuunka kaa ladneeynsiinkara sanka oo lagu dhaqo biyo qandac ah ama biyo diiran oo milix lagu daray.
- Haddii cabudhaad ba'ani qofka hayso, waxa la isticmaalikara dawada sanka lagu buufiyo ee bararka dejisa muddo 10 cisho ah.
- Dawooyinka xanuunka bi'iya sida baaraasetamool (paracetamol) iyo ibuborofeen (ibuprofen) iyagana waa ee ay cawina karaan.
- Dawada sanka lagu buufiyo oo wadata 'koortisoon' ayaa dadka waaweyn wax u tarikarta siiba hadday leeyihiin xasaasiyad.

## Ku daweeynta antibiyootikada

Haddii loo baahdo in antibiyootiku la isku daweeyo waa in benisiliin (penicillin) loogu horeeysiiyaa.

Ma ficna in dawooyinka antibiyootikada la iska qaato. Waxa dhicikarta in antibiyotikadu kaa idleeyso nooca baakteeriyada ee jidhka waxtarka u leh. Waxa kale oo iska qaadashada antibiyootikadu kugu keenikarta dhibaatooyin ay ka mid yahiin shuban iyo finan ka soo yaaca oogada. Waxa intaa dheer, in iska-qaadashada antibiyootikadu sababto inay baakteeriyadu u barato oo ay yeelato u-adkeeysi (resistenta). Haddii taasi dhacdo, waxa imanaysa in antibiyootikadu marka dambe waxba ka tariweeydo infekshanka halista ah ee baakteeriyadu keento ee aad run-ahaan ugu baahankartid in antibiyootika lagaaga daweeyo.

Detta är en översättning till engelska av faktabladet Till dig som har ont i bihålorna. Faktabladet går att ladda ner på svenska och flera andra språk på www.folkhalsomyndigheten.se/publicerat-material/

## Fiiro gaar ah u yeelo

CARUURTA: Haddii lagu arko caruurta, qandho badan, ama ilmaha oo is-qaadikari la', iyo hogaga sanqada mid ka mid ah ama isha cidhifkeeda oo yeelata barar/casaan waa tilmaamo ku tusaya inaad ilmaha si degdeg ah dhakhtar ugu geeysid.

DADKA WAAWEEYN: Dadka waaweeyn dhif buu sida caruurta infekshankaasi ugu xumaankaraa . Haddii se la isku arko xanuun ba'an, wejiga oo barara iyo/ ama xummad badan, waa tilmaamo ku faraya in degdeg dhakhtar loo raadsado. Waa inuu qofku raadsadaa dhakhtar haddii uu xanuun sii jiitamaa hogaga sanqada ka hayo 3 ilaa 4 todobaad ama ka badan.

Folkhälsomyndigheten
PUBLIC HEALTH AGENCY OF SWEDEN

Solna Nobels väg 18, SE-171 82 Solna Östersund Forskarens väg 3, SE-831 40 Östersund.
www.folkhalsomyndigheten.se